# DHINAC ISKAGA DHIGIDA XUKUNKA IMAANSHO LA'AANTA MAXKAMADDA EE KIISKA ISKA SAARIDA GURIGA

Ijaartayaasha waxaa looga baahan yahay in ay yimaadaan ("muuqdaan") kiiskooda iska saarida guriga. Haddii uusan ijaarte imaan, maxkamaddu waxay geli doontaa xukunka imaansho la'aanta maxkamadda 'default judgment' oo ka dhan ah ijaartaha haddii uu mulkiilaha gurigu uu raacay dhammaan sharciga ee loogu talagalay iska saarida guriga. Haddii ijaartayaashu ay leeyihiin xukunka imaansho la'aanta maxkamadda 'default judgment' oo ka dhan ah iyaga, mulkiilaha gurigu wuxuu yeelan karaa in mas'uulka 'sheriff' uu guriga ka saaro ijaartayaasha. Haddii xukunka imaansho la'aanta maxkamadda 'default judgment' la galay in ka yar afar maalmood ka hor ama uusan mas'uulka 'sheriff' uusan weli imaanin si uu u beddelo qufullada, waxaa dhici karta in uu weli jiro waqti lagu weydiisan karo maxkamadda in ay dhinac iskaga dhigto xukunka imaansho la'aanta maxkamadda 'default judgment' .

Xirmadani waxay ka kooban tahay dhammaan foomamka ay ijaartayaashu u baahan yihiin si ay u weydiistaan maxkamadda in ay dhinac iskaga dhigto xukunka imaansho la'aanta maxkamadda 'default judgement'. Dhammaann foomamka waxay u baahan yihiin in si taxaddar leh loo buuxiyo. Ijaartayaashu waa in ay sida ugu dhakhsaha badan foomamka uga gudbiyaan maxkamadda. Haddii xukun la galay, laakiin aan weli la fulin, waxaa dhici karta in uu jiro waqti ku filan oo xukunka dhinac la iskaga dhigo ama taariikhda maxkamadda oo cusub la qabto.

**Kani maaha talo sharci ah.** Kani waa macluumaad guud oo ijaartayaashu isticmaali karaan. Haddii aad rabto talo gaar ah oo ku saabsan kiiskaaga, waxaad u baahan doontaa in aad la hadasho qareen. Ijaartayaashu waxay isticmaali karaan foomam sharci ah oo bannaan oo ay ku jiraan tilmaamahani si mooshin looga gudbiyo maxkamadda, laakiin xafiiskayagu kuguma matalayo kiiska marka laga reebo anaga oo heshiis gaar ah kula leh adiga.

## Maxaan ka codsanayaa maxkamaddu in ay sameyso?

Maxkamaddu waxaa dhici karta in ay gashay xukun ka dhan ah ijaartaha iyada oo sababtu tahay ijaartaha oo aan imaan ama soo wacay imaanshaha u horreeya. Laakiin ma'uulka 'sheriff' uusan weli imaan si uu u beddelo qufullada waxaa dhici karta in uu weli jiro waqti lagu weydiisan karo maxkamadda in ay dhinac iskaga dhigto xukunka oo la helo taariikhda maxkamadda oo cusub. Si tani loo sameeyo, ijaartayaasha waxay gudbiyaan waxa loo yaqaano "mooshinka meel la iskaga dhigayo xukunka." Tani waxaa sidoo kale loogu yeeri karaa "mooshinka loogu talagalay khafiifinta ku guuldareysiga bixinta lacageed 'default'." Asal ahaan, ijaartayaashu waxay maxkamadda ka codsanayaan in ay siiyo iyaga fursad labaad 'do-over', sababta oo ah ijaartaha oo haystay sabab fiican oo uu kaga maqnaado taariikhda maxkamadda. Mooshinka dhinaca wax la iskaga dhigayo ayaa sidoo kale la adeegsan karaa haddii mulkiilaha gurigu uusan buuxin shuruudaha sharciga ah ee loogu talagalay warqada iska saarida guriga.

## Waa maxay shuruudaha looga baahan yahay ku guuldareysisa bixinta lacageed 'default'?

**Maxkamaddu waxaa loo oggol yahay oo kaliya in ay ijaartayaasha ka dhigto kuwo ku guuldareysay bixinta lacageed 'default' haddii ijaartuhu uusan ka soo muuqan imaanshaha u horreeya *oo* warqada iska saarida gurigu ay sax ahayd.** Haddii ijaartuhu uusan imaan maxkamadda oo mulkiilaha gurigu sameeyo sidaasi, warqada iska saarida guriga weli waa in ay tahay mid sax ah. Iyada oo ay tahay in mulkiilaha guriga ku marag furaa isaga oo dhaaranaya ama gudbiyaa caddeyn hoos timaada ciqaabta been abuurka oo sheegaysa, ilaa iyo inta uu ka og yahay, uu ijaartuhu weli ku nool yahay guriga.

## Maxaa ka dhigan sabab fiican oo looga maqnaado maxkamad?

Sababo fiican oo loogu maqnaado taariikha maxkamaddu waxaa ku jiri kara jirro, in lagu jiro isbitaal, naafanimo, gaadiid la'aan, ama dhibaatooyin farsamo oo ah dhanka soo wicitaanka maxkamadda. Faham la'aanta warqadaha maxkamadda iyada oo sababtu tahay caqabad dhanka luqadda ah, naafanimada dhanka waxbarashada, ama naafanimo kale oo sidoo kale noqon kara sababo fiican.
Ma jiro xeer adag ama degdeg ah, waxay ku xiran tahay qareenka in uu go'aansado haddii uu ijaarte haysto sababfiican oo uu uga maqnaado maxkamad.

## Waa maxay sababaha kale ee loogu talagalay dhinac iskaga dhigida ku guuldareysiga bixinta lacageed 'default'?

Haddii warqada iska saarida gurigu ay qalad tahay, maxkamaddu waa in aysan ijaartaha ka dhigin mid ku guuldareystay bixinta lacageed. Haddii aad aaminsan tahay in uu jirto dhibaato dhanka sharci ah oo lagu qabo warqada iska saarida guriga ee mulkiilaha guriga, taasi waxay noqon kartaa sabab dhinac la iskaga dhigo ku guuldareysiga bixinta lacageed 'default'. Ama, haddii mulkiilaha gurigi uu ogaa in ijaartuhu hantidu ku baneeyay taariikhda maxkamadda, ijaartaha ayaa ku sharrixi kara codsiga in dhinac la iskaga dhigo ku guuldareysiga bixinta lacageed 'default'. **Ijaartayaashu waa in ay soo raaciyaan macluumaad ku saabsan sababta aysan uga soo muuqan imaanshaha u horreeya.**

## Maxaa loo baahan in la geliyo warqadda maxkamadda?

Ijaartayaashu waxay u baahan yihiin in ay buuxiyaan dhammaan warqada ku jirta xirmadda oo ay ku jiraan tilmaamahani. Waxaa ka mid ah:

- **Mooshinka dhinaca wax la iskaga dhigayo**: ijaartayaashu waxay u baahan yihiin in ay ku buuxiyaan magacooda, magaca mulkiilaha guriga, lambarka kiiska, oo saxiixaan mooshinka
- **Caddeynta taageero**: ijaartayaashu waxay u baahan yihiin in ay ku buuxiyaan magacooda, magaca mulkiilaha guriga, lambarka kiiska, oo sharaxaan:
    - sababta ay uga maqnaadeen taariikhda maxkamadda
    - haddii ay jirto dhibaato dhanka sharci oo lagu qabo warqada iska saarida guriga ee mulkiilaha guriga iyo waxa dhibaatadu tahay
    - haddii ijaartuhu horeba u guuray, ijaartuhu waa in uu sharraxaa marka gelitaanka la guuray iyo sida mulkiilaha gurigu u ogaa in ijaartuhu uu guuray.

    Ijaartayaashu waa in ay saxiixaan oo taariikhda ku qori karaan caddeynta. Caddeyntu waxay hoos timaadaa ciqaabta been abuurka ah, markaa ijaartayaasha waxay u baahan yihiin in ay xaqiijiyaan waxa ay geliyaan caddeyntu in uu sax yahay.
- **Jawaab**: ijaartayaashu waxay u baahan yihiin in ay buuxiyaan jawaabta ku aadan iska saarida guriga ee ay gudbin lahaayeen haddii ay ka soo muuqan lahaayeen maxkamadda.

Jawaabta looma baahna in la faahfaahiyo, waqti dambe ayaana wax laga beddeli (beddeli) karaa.

- **Shahaadada adeega**: ijaartayaashu waxay u baahan yihiin in ay ku buuxiyaan magaca iyo cinwaanka mulkiilaha guriga, oo diraan dhammaan nuqulada warqada laga xareeyo maxkamadda.

Warqadahani oo dhani waxay u baahan yihiin laga xareeyo maxkamadda**muddo ku beegan ama ka hor** taariikhda ay ijaartuhu ahayd in uu guuro.

## Maxaa dhacaya ee xiga?

Maxkamadda ayaa dib u eegi doonta warqada oo go'aansan doonta haddii ijaartuhu oo haystay sabab fiican oo uu kaga maqnaado taariikhda maxkamadda. Maxkamaddu waxay sameyn doontaa mid ka mid ah waxyaabahani:

- **Dejinta dacwad dhageysi ku saabsan mooshinka**. Haddii maxkamaddi dejiso dacwada dhageyso, ijaartuhu wuxuu u baahnaan doonaa in uu yimaado oo sharraxo sababta uu ijaartuhu uga maqnaaday imaanshihii u horreeyay.
- **Oggolaanshaha mooshinka iyo taariikhda maxkamadda oo cusub**. Haddii ay maxkamaddu oggolaato mooshinka, ijaartuhu wuxuu heli doonaa ogeysiin ku saabsan taariikhda maxkamadda oo cusub.
- **Diidmada mooshinka**. Haddii maxkamaddu diido mooshinka, ijaartuhu waa in uu guuraa.

Iyada oo aan la eegayn waxa maxkamaddu go'aansato in la sameeyo, **si aad ah ayay muhiim** ugu tahay ijaartayaasha in ay ku wargeliyaan maxkamadda sida loo gaaro ijaartaha. Ijaartayaashu waa in ay lambarradooda telefoonka iyo cinwaanka email-ka kuwo cusub maxkamadda, oo xaqiijiyaan in ay suurtagal tahay in la dhaafo farriin, oo hubiyaan in telefoonadu ay dab leeyihiin. Haddii ijaarte aanu war dib uga maqlin maxkamadda maalin ama laba maalmood gudahood ka dib marka uu soo gudbiyo warqada, waa fikrad wanaagsan in ijaartayaashu dib u wacaan maxkamadda oo hubiyaan.

## Maxaa dhacaya haddii maxkamaddu oggolaato mooshinka oo jadwal kale u qabato dacwad dhageysiga?

Haddii maxkamaddu oggolaato mooshin dhinac la iskaga dhigayo xukunka imaansho la'aanta maxkamadda 'default judgment', waxay ka dhigan yahay in uu xukun marnaba dhicin.  Kiiska ayaa markale la bilaabmaya imaanshaha u horreeya.

Haddii ijaartayaashu u baahan yihiin caawimaad dhanka sharciga ah oo ku saabsan iska saarida guriga, waa in ay isla markiiba Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga kala xiriiran (888) 585-9638, ama iyaga oo email u diraya evictiondefense@oregonlawcenter.org

Haddii aad jeclaan lahayd in aad qareen kala hadasho xuquuqda aad leedahay, waxaad macluumaadka lagala xiriirayo ka heli kartaa xafiiska gargaarka sharciga oo kuu dhow oo ku yaala **https://oregonlawhelp.org/find-legal-help**

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda ijaartayaasha, oo uu ku jiro macluumaad ku saabsan nidaamka iska saarida guriga, ka heli kartaa www.OregonRentersRights.org